



Fariintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 13, 2021-ka

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Toddobaadka Aqoonsiga Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah

Waad ku mahadsan tihiin dadaalkiina joogtada ah, shaqadiina adag iyo adeega inta lagu jiro dhibaatooyinka aan horay loo arag ee 18 bilood ee la soo dhaafay. Guud ahaan cudurka baahsan, dhibaatooyinka naxdin leh ee dhanka isirka, dabka, deganaansho la'aanta siyaasadeed, barafka, abaarta, shaqaale yaraanta, caqabadaha shakhsi ahaaneed iyo khasaaroyinka qalbiga dhaawacaya, waxaad u adkeysateen oo sii wadaan bixinta adeegyada muhiimka ah ee la siinayo ku dhawaad 29,000 oo ah dadka reer Oregon ee qaba I/DD.

[Guddoomiyaha Gobolka Brown ayaa toddobaadkan ku dhawaaqday Toddobaadka Aqoonsiga Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah \(DSP\)](#) ee Oregon dhexdeeda. Waxaan idinla wadaagayaa mahadnaqeena dhammaantiin, DSP aan leenahay. Waxaad tihiin qalbiga iyo ruuxda ODDS oo dhammaanteena waa nahay.

Shaqadiinu waa mid muhiim ah, mana aha mid riqiis ah. Waan aqoonsanahay wax huridiina shakhsi ahaaneed, saacadaha dhaadheer ee aad shaqeynaysaan , iyo sida aad u sii wadaan in aad si sax ah wax ugu qabataan kuwa aad u adeegtaan inta badan marka qofna uusan idin fiirsanaynin. Waqtiyadu waa kuwo xad-dhaaf ah waxaadan dareemi kartaan in aan la idin arkayn. Fadlan ogaada in aan idin qadarinayo oo aan idiinka mahadcelinayo wax kasta oo aad qabataan.

Inta lagu jiro caqabadaha hadda jira, Guddoomiyaha Gobolka Brown ayaa ka codsanaysa kuwo badan oo idinka mid ah in ay aqbalaan caqabad kale: [qaadashada tallaalka COVID-19](#). Anaga ODDS ahaan waan fahamsanahay in DPS qaarkood ay dareen xoogan ka qabaan waajibaadkani. Waanu ognahay in ay dani idinka hayso kuwa aad u adeegtaan. Ma rabno in aanu idin lumino. Faldan u tixgeliya in tallaalkani uu yahay hab kale oo aad kuwa aad u adeegtaan ku tusaysaan inta ay le'eg tahay danta aad u haysaan iyaga.

Waanu idiin baahahay oo aan idiinka mahad celinaynaa. Waxaan idinku dhiirigelinayaa [in aad dhageysataan oo tixgelisaan khibradaha wanaagsan ee dadka aad isku faca tihiin ee la tallaalay](#) oo ka meeraysigiina/warwareegidiina arrintaasi kala hadashaan xirfadle daryeel caafimaad. Naga dhiga [ilaha tallaalka ee gobolka](#).

Waad mahadsan tihiin mar kale, DSPs! Waxaa sharaf ii ah in aan qayb ka noqdo bulsho dareenka dadaalkaasi xoogan la wadaaga dadka qaba I/DD.

U adkeysta Midba midkiina kale ha taageero. Ku jooga caafimaad oo badbaado ku sugnaada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka

aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.